

Bayaanka Saamaynta Sinnaanta ee soo Bandhigidda iyo Soo-jeedinta Guddiga Dugsiga

Cinwaanka: Dib u Furista iyo Cusboonaysiinta Barashada Fog

Taariikhda: Janaayo 27, 2021

**Miyaa QALABKA QORSHEYNTA SINNAANTA JINSIYADA BPS la
isticmaalay? (Haa ama Maya):**

Haa (AWC, Imaanshaha)

Qaybaha Qalabka Qorshaynta Sinnaanta Jinsiyada BPS	Soo Koobid / Sabab
<p>1. Soo jeedin / Soo bandhigid & Saamaynta <i>Waa maxay natiijooyinka iyo saameynta codsiyada/soo-jeedinta la rabo? Ayaa hogaamiyay hawshan, miyayna ka tarjumayaan kaladuwanaanta ardayda / qoysaska BPS?</i></p>	<p>Macnaha guud ee saamaynta xun iyo kala qaybsanaanta ee aafada cudurka ardayda Boston Public Schools, kormeeraha guud wuxuu codsanayaa isbadbadal ku meelgaar ah oo ku saabsan siyaasadaha Guddiga Dugsiga sida ay ula xiriirto kuwa soo socda:</p> <ol style="list-style-type: none"> 1) Siyaasada Dalacaadda / Sii Haysashada 2) Siyaasad Qalinjabinta 3) Nidaamka gelitaanka ee Fasallada Shaqada Sare (AWC)
<p>2. La jaanqaadida Qorshaha Istiraatiijiyadeed <i>Sidee soo jeedinta / bandhiggu ula jaanqaadayaa qorshaha istiraatiijiyadeed ee degmada?</i></p>	<p>Dabacsanaanta kumeelgaarka ah ee siyaasadahaan waxay la jaan qaadayaan qorshaha istiraatiijiga ah ee BPS:</p> <p>1.6 Horumarinta iyo kormeerka horumarka laga gaarayo ee ku aadan gaarista yoolalka cad ee loogu talagalay iskuulada iyo xafiiska dhexe ee kusaleysan hirgalinta istiraatiijiyado lagu baabi'inayo Nusqaamaha fursadaha iyo guuleysiga (gaar ahaan Bartayaasha Ingiriiska iyo ardayda naafada ah) iyo xafiiska dhexe ayaa mas'uul ka noqon doona lana xisaabtami doona la socodka horumarka iyo bixinta taageerada loogu talagalay isla xisaabtanka iyo xalinta dhibaatooyinka.</p>
<p>3. Falanqaynta Xogta <i>Xogtee ayaad u adeegsatay inaad ku falanqeyso arrinta / mowduuca? Miyaa lagu kala saaray midab? Maxay muujisay marka loo eego kala duwanaanshaha dadka taariikhda la haybooco ah?</i></p>	<ol style="list-style-type: none"> 1. Siyaasada Dalacaadda / Sii Haysashada: 1,117 ardayda ayaa loo aqoonsaday in lasii hayn doono inta udhaxeysa Juun iyo Oktoobar 2020. Ardayda labka ah ee Madow iyo Latinx, iyo sidoo kale ardayda naafada ah iyo Bartayaasha Ingiriiska waxay ku xisaabsan yihiin saamiga aadka uweyn ee sii haynta. Xaadiritaanka, iyo xogta qiimeynta waxaa loo kala saaray jinsiyadda / qawmiyadda waxayna muujiyeen isbadallo is lamid ah. 2. Shuruudaha Qalinjabinta: Heerarka qalin-jabinta ee ardayda Caddaan iyo Aasiya waxay ahaayeen 92%, halka ardayda Madowga iyo Latinx ay ahaayeen 76% iyo 74% siday u kala horreeyaan. 3. AWC: Ardayda Madow iyo Latinx ayaa xaddi weyn oo ku habooneyn ayaa looga diiwaan geliyay diiwaangelinta taariikh ahaan iyo sanad dugsiyeedka SY 20-21. SY 20-21, 453 arday waxay heleen casuumaad halka 116 iska qoreen fasalka 4-aad AWC. 60% casuumaadaha waxaa loodiray ardayda Caddaanka iyo Aasiya, iyo 71% ardayda isqortay waa Cadaan iyo Aasiyaan, in kastoo Caddaanka iyo Aasiyaanka ay ka kooban yihiin kaliya 24% ardayda BPS.

<p>4. Kaqeybgalka Daneeyayaasha <i>Yaa ku hawlanaa (tirada, dadka, iyo doorarka), sidee iyo maxa ka dhashay? Maxay ardayda / qoysaska saamaynta ugu badan ku yeesheen codsiga/ soo bandhigistu oraneysaa?</i></p>	<p>Soo jeedintu waa in ay bixisaa si deg deg ah, laakiin ku meel gaadh ah, dabacsanaan loo helo kormeeraha guud ee dalacaada / sii haynta, xaadiriitaanka, qiimaynta, iyo siyaasadaha qalinjabinta. Kaqeybgalka socda ee daneeyayaasha ayaa isla mar wada dhici doona, oo ay kujiraan kaqeyb galinta ardayda, qoysaska, barayaasha, iyo hogaamiyaasha iskuulka, iyo abuurida kooxo shaqo si loo sameeyo loona taliyo siyaasadaha dib loo eegay ee loogu talagalay sanad dugsiyeedkaan oo kaliya.</p> <p>AWC: Qiyaastii 100 daneeyayaal ah ayaa ku hawlanaa Xarunta Sinnaanta Bulshada 22ki Janaayo, oo ay ku jiraan ururada bulshada, qoysaska / waalidiinta, u-doodayaasha, iyo la-hawlgalayaasha BPS. Hogaamiyaasha iskuulka (laba cadaan, mid Aasiyaan ah, midna Madoow) oo kuyaala afar iskuul oo leh barnaamijyada AWC kuwooda ugu waawayn ayaa hawl galay sidoo kale dhamaan bishii Disembar iyo Janaayo.</p> <p>Intaa waxaa sii dheer hogaamiyaasha iskuullada haray ayaa ku howlan howsha, waxayna bilaabeen wada hadal ku saleysan iskuulka macalimiinta AWC, Golaha Waalidiinta Dugsiga iyo / ama Golaha Rugta Dugsiga.</p>
<p>5. Xeeladaha Sinnaanta Jinsiyada <i>Sidee soo-jeedintan / bandhiggu u yareeyaa kala-duwanaanta una kordhiyaa sinnaanta, gaar ahaan sinnaanta jinsiyadd? Waa maxay cawaaqibta aan la filayn? Waa maxay Istaraatiijiyadaha kabayo oo ka sii horumari doona sinnanta?</i></p>	<p>Dabacsanaanta ayaa siin doonta gargaar inta badan Madow, Latinx, ardayda Ingiriisiga barta, iyo ardayda Waxbarshada Gaarka ah ee sida aadka uxun saamaynta ugu leh siyaasadaha jira inta lagu jiray cudurkan aafada. Kooxaha shaqeyya waxay tixgelin doonaan istiraatiijiyado horumarinaya sinnaanta jinsiyada markay horumariyaan siyaasado cusub oo la soo jeediyey.</p>
<p>6 Miisaaniyadda & Hirgelinta <i>Waa maxay saameynaha miisaaniyadu? Sidee fulintu u xaqiijin doontaa ujeedooyinka sinnaanta? Ma jiraan hoggaan iyo shaqaale Madoow, Latinx ah oo keena muraayad sinnaanta jinsiga?</i></p>	<p>Saamaynta Miisaaniyadda iyo hirgelinteeda si loo go'aamiyo. Kooxda fulinta kormeeraha guud iyo kuwa kale ee loo xilsaaray hirgelinta waxay u keeni doonaan muraayad sinaan jinsiyada ah marxalad kasta. Iskuulku markuu dooranayo inuu bixiyo adkaynta AWC guud ahaan fasalka 4-aad, waxaan rajeyneynaa kharash laxiriira balaarinta luuqada aduunka iyo taageerooyinka baraha.</p>
<p>7. La Xisaabtanka & Isgaarsiinta <i>La Xisaabtanka & Isgaarsiinta Sidee saamayn loogu samayn doonaa qiimeynta, diiwaangelinta iyo la socodsiinta daneeyayaasha? Ayaa masuul ka noqon doona tan?</i></p>	<p>Iyadoo loo marayo amarka kooxaha shaqada, tallaabooyin iyo qorshooyin cad ayaa loo dejin doonaa si loo qiimeeyo, loo diiwaangaliyo, loona wadaago saamaynta.</p>